

Layliska: The Sarah Bonnell Way

Hagaha Waalidka/Daryeelaha

Cilmi baadhida waxbarashadda waxay si soo noqnoqta u muujisay ahmiyada uu laylisku u leeyahay waxbarashadda ardayda: Saamaynta layliska tayada sare si joogta ah ayay u wanaagsantahay, keentaana celcelis ahaan horumar dheeraad ah ee shanteeda bilood sanad dusgiyeedkiiba – John Hattie, *Barashadda Muuqata ee Macalimiinta* (2012)

Goobta Sarah Bonnell, waxaan rabnaa inad innantaada u habbayno laylis taas oo:

- **Leh ujeedo** macalimiinta iyo ardayda waa inay u caddaataa waxay tahay ujeedada qaybta laylisku ay tahay.
- **Dhiirigelinta lahaanshaha ardayga**: meesha ay habboontahay, ardayda waxaa la siiyaa ikhtiyaarka hawsha layliska ama qaabka.
- **Horumarinta Kartida**: Layliska waa ay heli karaan, oo la gaadhiiso waxbarashada dhammaan ardayda.
- **Yahay macquul**: cilmi baadhidu waxay muujisaa in hawlaha gaagaaban, ee loo qorsheeyo sida badanka ah, ay saamaynta ugu wayn ku leeyihiin waxbarashadda.
- **Hela faallo celin**: ardaydu waa inay helaan faallo celin gaar ah oo wakhti haboon oo ku saabsan laylisvadooda.

Waxa jira saddex nooc oo laylis ah xaga Sarah Bonnell:

1. **Diyaarinta** wixii hawlaha fasalka ah tusaale cilmi baadhida hore ee mowduuca.
2. **Ku celcelinta** laylisyada xoojiya xirfadaha la bartay tusaale, ku celcelinta masalooyinka xisaabtae raacsan qaabka waxbarida.
3. **Mashruuca** laylisyada hawlaha xiliga dheer la kordhiyaya kaas oo uu ardaygu ku dabaqo waxbarashaddii hore oo uu ku muujiyo xirfadaha lagu dhigo fasalka.

Taageeradaadiyo **dhiirigelinta** waxay ku yeelan kartaa saamayn wayn dhammaystirka layliska ee innantaada. Markay suuragalka tahay, waxaanu waydiin waalidka daryeelayaasha inay:

- Si caadi ah u soo eegto qorsheeyaha innantaada, oo ay isticmaalaan bogga wixii walaacyada wada xidhiidhka si loo sameeyo barre gaar ah.
- In la hubiyo inay jirto meel, degen oo ku habboon ardaydu inay ku dhammeeyaan laylisyadooda & ku dhiirigelisa iyaga inay sidaas sameeyaa.

Intee jeer ayaa laylis loo qorshayn doonaa innantayda?

Ma haysano jadwal laylis oo rasmi laga dhigayo, sida inta jeer ee casharada todobaadka waxay ku kala duwatahay inta u dhexaysa maaddooyinka iyo kooxaha sanadka. Macalimiintu waa inay ka qorsheeyaan layliska marka ay ku habboontahay maaddada ama mowduuca.

Kuma yaalo wax layliska ah qorsheeyaha innantayda marka aan eego -- tan macnaheedu miyaa inaanay waxba helin?

Ardayda waxaa laga filayaa inay ku diiwaangeliyaan qorsheeyahooda, oo ay la socoto taariikhda la filayo.

Haddii innantaadu ay u eekaato inay ku leedahay waxyar qorsheeyaheeda, fadlan iyadda waydii waxa uu yahay layliska loo qorsheeyay.

Haddii aad ka walaacsantahay inaanay innantaadu u isticmaalayn qorsheeyaheeda si waxtar leh, fadlan la xidhiidh barraheeda gaarka marka ay ugu horaysaba.

Innantaydu ma ka shaqayn kartaa layliskeeda?

Haa! Xaruntayada wax lagu bartaa waxay furantahay badanka maalmaha laa 5 fiidnimo haddii innantaadu ay jecleaan lahayd inay ku dhammaystirto layliskeeda dugsiga.

Ballanka Layliska Sarah Bonnell

Ardaydu waa inay:

- **KU FAANAAN**: Had iyo jeer dhammaystir layliska ilaa inta awoodooda ah, iyo taariikhda la filayo.
- **MEEL SARE HIIGSO**: Ka filo laylisku inuu caqabad yeelan karo.
- **SI ADAG U SHAQEE**: Ku qor layliska qorsheeyaha:
- **WANAAGSANOW**: Ku wargeli waalidka/daryeelaha wax ku saabsan qorshaynta layliska, ee ku saabsan iyaga markasta oo ay suuragal tahay laakiin aan u oggolaanay iyagu inay qabtaan shaqada.
- **HA KA CUDUR DAARAN**: Ogow in macalimiintu ay ciqaabi doonaan haddii ay dhammaystiri waayaan layliskooda.

Macalimiintu waa inay:

- Hubiyaan laylisku inuu ujeedo leeyahay.
- Dejiyaan laylis balaadhin kara waxbarashadda.
- Ka bixiyaan faallo celin wakhti haboon oo gaara leh.
- U kala saaraan layliska si habboon.
- Hubiyaan in ardaygu haysto wakhti habboon oo uu ku qoro layliska iyo taariikhda la filayo qorsheeyahooda.
- La socdaan dhammaystir la'aanta iyagoo isticmaalaya Qaabka SB.
- La xidhiidh waalidka/daryeelayaasha marka ay habboontahay.

Wax badan noo sheeg:

Aragtiyahaaga ku saabsan laylisku aad ayay muhiim noogu tahay, haddii aad awoodo, fadlan dhowr daqiiqo ku qaado inaad buuxiso xog qaadista laga heli karo summada QR, linkiga shabakada ama websaydka iyo abka Sarah Bonnell.

<https://goo.gl/forms/fisqjwmaGkEyQSn2>

